



Vklass ayaa beddelaya Hjärntorget

Bisha agosto ayaan bilaabi doonnaa inaan isticmaalno Vklass booskii Hjärntorget. Waxaad halkaan kasii akhrin kartaa wixii ku saabsan Vklass iyo sidaad u isticmaali doontid.

Vklass waxaad kala socon doontaa horumarka aqooneed iyo xaadirka ilmaha, laga fulin karaa wada hadalka horumarka ardayga oo laga la xiriiri karaa iskuulka.

Waxaan sii wadaynaa inaan Google Classroom u isticmaalno hawlaha xiisadaha sidii hore oo kale, xattaa markii Hjärntorget lagu beddelo Vklass.

Waxaad geli kartaa Vklass xilli dugsiyeedka deyrta 2022

Markii xilli dugsiyeedka deyrta uu bilowdo waxaad geli kartaa oo isticmaali kartaa Vklass. Waxaad app-ka Vklass kasoo degsan kartaa App Store iyo Google Play ama ka gal www.vklass.se.

Markii aad Vklass app-ka ka gashid ama bogga internetka waxaad marka u horreysa dooranaysaa ururka/hey'adda "Göteborgs stad UBF". Kaddib wuxuu waalidku (cidda ilmaha ka mas'uulka ah) dooranayaa "Logga in med Göteborgs Stad EID" oo ku galayaa BankID, halka ardaydu ku galayaan akoonkooda iskuulka caadiga ah.

Si waalid ahaan aad u dirtid ama u heshid farriimo si shaqsi ah kugu socda oo iskuulka ka socdo waa muhiim inaad gelisid emailkaaga marka koowaad ee aad gelaysid Vklass. Ku qor sidoo kale telefoonkaaga gacanta si aad u heshid farriimo sms ah markii ilmuhu iskuulka ka maqnaado.

Xiriirka (wada hadalka) laga bilaabo 30 juun

Lag bilaabo 30 juun ardayda iyo waalidiintu ma geli karaan Hjärntorget. Haddii aad u baahan tahay inaad la xiriirtid iskuulka ka hor inta uusan xilli dugsiyeedka deyrto bilaabmin waxaan kugu la talinaynaa inaad isticmaashid email ama telefoon. Halka laga la xiriiro waxaad ka helaysaa bogga iskuulka.

Caawinaad iyo agab kaalmo

Wixii warbixin intaa dheer oo ku saabsan gelidda, siduu u shaqeeyo iyo wixii caawinaad ah waxaad ka helaysaa Vklass.educ.goteborg.se.

Wax su'aalo ah ma qabtaa?

Haddii aad qabtid su'aalo ama fekarro waxaan kugu soo dhawaynanaa inaad lasoo xiriirtid iskuulka.